

Helitaanka Qorshaha Luqadda Lagu Soo Bandhigayo Xogta

*Ma ogtahay in ka badan 500,000 oo caruur iyo dad waaweyn ah oo ku nool Gobolka Washington ay ku hadlaan luqaddahooga aasaasiga ah oo aan Ingiriisi ahayn?*¹

DCYF waxay abuuraysaa Qorshe Helitaanka Luuqadda ah si ay uga caawiso qof walba inuu helo cadaalad iyo waqtigii loogu talagalay barnaamijyada iyo adeegyada luqadda ay doorbidaan.

Ujedooyinka Qorshaha:



HAGAAJI BARNAAMIJKAA HELITAANKA LUUQADDA:

Balaadhi Kooxda Adeegyadeena Iisticmaalka Luuqada si loo caawiyo bulshooyinkeenna kala duwan.



QEYBAHA ADEEGYADA TELEFOONKA:

Hubi in fariimaha telefoonka khadadka muhiimka ah lagu heli karo labadaba Ingiriisi iyo Isbaanish.



HELITAANKA FUDUD EE LUQADDA:

Fudaydi nidaamka lagu helayo turjumaan ama turjumaado.



DHOKUMANTIYADA MUHIIMKA AH:

Aqoonso dhokumantiyada muhiimka ah si loo hubiyo inay turjuman yihiin oo la heli karo.



FAAFI KELMADA: ADEEGYADU WAA BILAASHI:

Kor u qaad helitaanka caawinta luqadda bilaashka ah iyada oo loo marayo warbaahinta bulshada, wabsaaytka DCYF, wargeesyada iyo noocyada kale ee isgaadhsiiinta.



KOR U QAAD NIDAAMKA CABASHADA:
Samee nidaam wakaaladeed cadaalad ah oo wax wanaagsan qabanaya si uu helo oo uu wax uga qabto tabashooyinka jira.



WANAAJI KHAYRAADKA DHINACA TIKNOOLAJIYADA

Kordhi waxyaabaha la turjumay ee wabsaaytka DCFY, iyadoo laga dhigayo dhammaan macluumaadka kuwo la heli karo.




KU XIDHNOW BULSHADA:

Hirgali xidhiidh wanaagsan oo kaala dhxeeyaa shuraakada bulshada si loo helo taageerada dhinaca luqadda oo loo ururiyo falcelinta.



SOO URURINTA XOGTA IYO FALANQAYNTA:

Kordhi oo wanaaji xog ururinta iyo falanqaynta luuqadaha lagu hadlo iyo baahiyaha bulshada.



WANAAJINTA JOOGTADA AH EE QORSHAHA:
Aqoonso oo isticmaal hababka ugu fican si aad si joogto ah kor ugu qaado waxtarka adeegyada luqadda.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

¹Xafiiks Maamulka Maaliyadeed ee Gobolka Washington, Waaxda Cilmi-baadista iyo Saadaalinta. (2016). *Dadweynaha la Qiyaasay ee Limited English Proficiency (Luuqaddooda Ingiriisugu Xaddidan tahay, LEP) ee Gobolada iyo Degmooyinka Xogta & Cilmi-baadista Washington*. <https://ofm.wa.gov/washington-data-research/population-demographics/population-estimates/limited-english-proficiency-population-estimates>.

U.S. Census Bureau. (Xafiiska Tirakoobka Maraykanka) (2020) LUQADDA LAGAGA HADLO GURIGA American Community Survey (Xog ururinta bulshada Maraykanka) (ACS) 5-sano ayaa Qiyaasaha Mawduucyada Shaxda, Shaxda S1601. Lagasoo dheegtag <https://data.census.gov/table/ACSST5Y2020.S1601?q=s1601&g=040XX00US53>.

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, asal ahaan halka uu kasoo jeedo, muwaadnimada ama xaalada socdaal, da'da, wacyiga jinsi ama aqoonsiga jinsiga, mujaahid ama xaalada milatari, xaalada hooyada ilmaha naas-nuujinaysa, iyo helitaanka dareen kasta oo jidheed, ama naafanimo maskaxeed ama isticmaalka hagitaanka eyga ama adeegyada xayawaanku qabto. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.